Erayga iyo Maanta Somtwt 0171
Wakiillada

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqli jirteen saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **Wakiilka.** Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda, Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Bawlos. Sii dhegayso barnaamijka ka hadlaya **Wakiilka.** Balse intaynaan idiin billaabin aynu wada dhegaysanno qasiiddadan.

Song: Reel---Cut----

Warqaddii kowaad ee rasuul Bawlos u qoray dadka reer Korintos 4 ayaa waxaa ku qoran warbixin ku saabsan qofka noqonaya wakiilka Ilaah iyo sida Ilaah inoogu kalsoonaado waxyaalaha qaar. Haddaan yara jaleecno Warqaddii kowaad ee rasuul Bawlos 4:1 ayaa waxaa ku qoran sidatan:

"Ha lanagu tiriyo inaannu nahay midiidinyada Masiixa iyo wakiillada waxyaalaha qarsoon ee Ilaah. Haddaba waxaa laga doonayaa wakiillada in aamin laga helo."

Haddaba waa maxay waxyaalaha qarsoon ee halkan laynoogu sheegay? Mar buu qorshaha Ilaah ee nabaadiinadu qarsoodi ahaa; laakiin haatan qarsoodigii wuu ka baxay. Waxaa la muujiyey in qorshaha Ilaah ahaa inuu Yuhuudda ka soo dhex bixiyo Masiixa dunida loo soo dirayo, oo noqonaya badbaadiyaha dadka oo dhan, magaciisuna waa Ciise.

Ciise waxaa la saaray isku tallaabta, wuu silcay dabeetana wuu dhintay. Wuxuu noloshiisii si muuqata ugu bixiyey

iskutallaabta si aad ku rumaysato oo aad u lahaato nolosha daa'imka ah. Waxaa la cafinayaa dembigaaga markaad Ilaah u soo jeesato. Waxaan taa loo yaqaan toobadkeen. Waxaad ka toobad keenaysaa dembigaaga, waxaanad ka soo leexanaysaa dariiqyadii guracnaa ee noloshaada, iyo sharkii aad ku dhex noolaydba.

Waxaad si daacadnimo leh Ilaah u weyddiisanaysaa inuu Ciise ka dhigo Sayidkaaga iyo Bixiyahaaga, waxaanad ku noolaanaysaa nolol cusub, waxaanad nabaadiinada ku helaysaa inaad isaga ku jirto oo aad rumaysato. Haddaba tani waxay ahayd qarsoodigii weyn. Dad badan oo dunida ku nool ma aysan ogayn qorshahan ilamaa uu Ciise yimid kol dambe.

Haatanna, masiixiyiinta ayaa qarsoodiga Ilaah hoggaanka u haya. Ahmiyadduna waxay tahay inaan sir ama qarsoodi laga dhigin, waase in cid waliba oo aad gaari kartaan aad la wadaagtaan qarsoodigan. Adigoo taas maanka ku haya, ayaa haddana waxaa jira dood ku saabsan wakiillada loogu kalsoonaaday hawshaas oo laga doonayo inay muujiyaan inay aamin yihiin.

Haddaba bal aynu qaddar isla eegno, maaddaama aynu rumaysatayaasha Masiixa nahay sidaan ugu muujin karno Ilaah inaynu nahay wakiillo daacad ah. Waxaa jira siyaabo badan oo aynu taas dadka ugu muujinayno Ilaah, mid ka mid ahna waa in laynaga dhex arko **niyad-sami shakhsi ahaaneed**. Sidaan horeyba idiinku sheegnay, markii aynu Masiixa rumayno waxaa laynaga doonayaa inaan ka tagno nolosha dembiga lahayd, oo aynu Ilaah

ugu noolaanno nolol hufan oo ay mahadnaqid la jirto, innagoo Ilaah ku amaanayna wixii Masiixu noo sameeyey. Qaarna waxay ku muujiyaan qarsoodiga inay noqdaan waalidiin Ilaah ka cabsada. Si markaa ay u awoodaan inay rumaysadkooda u gudbiyaan carruurta waa in carruurta la baro Sayid Ciise Masiix.

Taasina waa sida masiixyiinta qaar ay aaminsan yihiin inay rumaysadka Masiixa dhaqangal ugu dhigaan wakhti kasta. Qaar kale oo masiixiyiin ah ayaa rumaysan sida ay Ilaah ugu muujin karaan daacadnimadooda inay tahay in la barto hadalladiisa. Taasina waa waxa erayga xerta Masiixa uu ka macne yahay. Kuwii ugu horreeyey ee Masiixa racana waxaa loo yaqaanay xertii Masiixa. Markaasina, qofka doonaya inuu wax akhristo oo barto, oo raba inuu Masiixa wax ka ogaado, waa inuu xigmad ahaan Masiixa daacad u ahaado. Waxaa jira oo kale dad masiixiyiinta ka mid ah oo adkeeya in Masiixa loo markhaati-furo si Ilaah daacad loogu noqdo.

Taasina waa waxa Masiixu inaga filayo inaan samayno markii uu lahaa sida ku qoran Injiilka sida Matayos u qoray 28:19, **"Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga, oo ku baabtiisa magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Quduuskaa."**

Dhowrkii arrimood ee aynu idiin soo sheegnay ayaa ka mid ah siyaabaha ugu habboon Masiixa loogu muujiyo daacadnimadeenna, laakiin maahan in hal qodob oo ka mid ah dhowrka ariimood la sameeyo, laakiin waa in giddigoodba la wada sameeyo qodobadaas iyaga ah. Ha yeeshee, maanta waxaan ka hadlayaa wax ku saabsan mawduuca khuseeya in Masiixa daacad loo ahaado, balse ka yara duwan

arrimaha aynu kor ku soo xusnay. Mawduuca caawa wuxuu ku saabsan yahay, sida ay tahay inaan xoolaha aan masuulka ka nahay loo maareeyo. Waa inaan ka fiirsannaa maalka Ilaah ina siiyey, oo aynu isaga wakiilka uga nahay oo isweyddiinna waxa aynu ka yeelayno lacagta aynu haysanno. Lacagtu waa mid ka mid ah aasaasiyan waxyaabaha keeni kara inaan Ilaah daacad u ahaanno iyo inaynaan u ahaan. Waxaa la eegayaa haddaba sida aynu ugu tagrifalno, ujeeddadii uu inoo siiyey iyo danta, inaan ku ciyaarayno iyo in kale, inaan bakahayl nahay iyo in kale. Waxaa kaloo la eegayaa inaan garansiisan nahay in lacagta Ilaah inagu barakadeeyey ee uu ina siiyey ugu adeegayno boqortooyada Masiixa iyo in kale.

Marka dhanka kale laga eego waxay ka macne tahay inaan Ilaah ku caabudno jeebka. Waana marka aynu barakadii Ilaah ina siiyey aynaan innaga oo keliya isticmaalin, oo aynaan tacab adduun kaliya ula isticmaalin, ama dhar aan xiranno, ama gawaari, laakiinse aan u hurno inaan dad badan u suurtagalinno sidii ay ku heli lahaayeen badbaadada Ciise Masiix.

Ugu dambayn, waa waxa qof wakiil ah uu sameeyo—qofka wakiilka ah si wanaagsan ayuu u ilaaliyaa wixii lagu ammaaneeyey. Bal haddaba tan ka fakar. Lacagta sida daacadda ah waa wax cabbirkeeda la wada ogsoon yahay; Waxaa ogaan karnaa heerka lacagta aan leenahay haddii laysku barbardhigo waxa aynu haysanno iyo waxa aan kharash garayno, iyo intaan maalgashannay.

Halkaas ayaa laga ogaan karaa inaad tahay qof tacabka lacagta yaqaan iyo in kale.

Haddaba waxaa jira qarsoodi dadka masiixiyiinta ah ay garanayaan oo kitaabka ku qoran, waxaana weeye in awoodda lacagta aanay ahayn kharashgaraynteeda. Awoodda dhabta ah ee lacagta waa inaad hesho ama soo saarto lacag badan; waa in uu jiro korsaar aad ku qanacsan tahay si wax badan loo helo. Balse masiixiyiintu way ka soo horjeedaan taas, waayo wax waliba waxaa laynoo siiyey inaan Ilaah wakiil uga ahaanno. Markaasina ahmiyaddu maahan inaan innagu lacag badan samayno; muhiimaddu waa inaan u isticmaalno nidaam tusaale u noqda dadka kale, si dadka loogu keeno Masiixa.

Way fududahay inaad garato haddii dadku ay Ilaah u mahad naqayaan iyo inay si masuuliyad ku dhisan ugu isticmaalaan hawlaha Masiixa. Marka la qiimeeyo sadaqada qofku bixinayo, wakhtiga cibaadaysiga, ayaa muujinaysa waxa qofka uu ka fikirayo. Haddii qofku uusan Ilaah waxba siin, waxay muujinaysaa, in rumaysadkoodu uusan korin ama inaanay wax rumaysad ah lahayn.

Dad badan uma xisaabsana waxa ay ku bixinay-aan lacagtooda, waxaanan oran lahaa waa in qof kasta oo masiixi ah uu ka fikiro sida ay maalkooda u maaraynayaan, haddii ay wax iibsanayaan iyo haddaanay iibsanayn, waxa ay kharashgaraynayaan, iyo waxa aanay doonayn inay lacag ku bixiyaan.

Bal aan talo kaa siiyo sida qofku u xisaabtamo. Kaba soo qaad inuu haysto 10 doollar oo marka la eego dad badan oo dunida ku nool, aanay lacag yar ahayn. Kaba soo qaad in qofka dakhligiisu yahay 10ka doolar uu hawlaha Ilaah ugu yabooho 1 centi. Haddaba, hadduusan qofkaasu ahayn mid sabool ah oo

dad badan biila, ayaa waxaa la oran karaa ninkaasu waa bakhayl. Qofka masiixiga ah ee haysta 10ka doollar, waa inuu bixiyo 1 doolar, ama 1% waxa uu haysto. Taasina waa bilowga sadaqada, oo wixii intaas ka dambeeyana waa inuu labanlaabo, marka barakadu badato.

Haddaba inta hanti ama lacag ah ee qofku haysto ayey ku xiran tahay. Haddii uu wax badan haysto waa inuu boqortooyada Ilaah wax badan ugu yabooho, isagoo masaakiinta, dadka saboolka ah ee baahiyada kala duwan qaba iyo maxaabiista caawinaya. Haddii qofi hanti badan leeyahay, oo uu bixiyo 2 iyo 3% dakhliga soo gala, kuwaas oo kale waa dad bakhayl ah, oo waxaa wax layska weyddiin karaa rumaysadkooda.

Dad badan oo ku dhaggan xoolaha ayaan qiyaasayaa inaanay ahayn rumaystayaal dhab ah. Haddii aad hubaal ahaan garanayso Ciise Masiix, oo aad og tahay ahmiyadda ay leedahay in dadku ay rumaystaan Masiixa iyo in hawsha dunida ka socota ee boqortooyada la taageero ayaan lagaa filaynin inaad noqoto qof bakhayl ah.

Waa inaad wax u bixiso si aad ku caawiso boqortooyada, haddii kale noqon maysid wakiil wanaagsan, hadaadan deeqsi ahayn. Waxaa aayadda kowaadi leedahay: "**Ha lanagu tiriyo inaannu nahay midiidinyada Masiixa iyo wakiillada waxyaalaha qarsoon ee Ilaah.**" Waa hagaage, waxaan ka hadalnay waxyaalaha qarsoodiga ah, haddaba waxaa aan qarsoodiga ahayn waa hantida Ilaah ku siiyey ee aad maamulayso. Waxaan xusuustaa qisadii nebi Yuusuf sida ay ugu qoran tahay kitaabka Bilowgii 39:4-5, oo leh:

“Isaguna raalli buu Yuusuf ka ahaa, Yuusufna waa u adeegi jiray, oo wuxuu isagii ka dhigay kan gurigiisa u sarreeya, wixii uu haystay oo dhanna gacantiisuu wada geliyey. Oo waxay noqotay in wakhtigii uu ka dhigay kan u sarreeya gurigiisa iyo wixii uu haystay oo dhan, uu Rabbigu gurigii kii Masriga ahaa u barakeeyey Yuusuf aawadiis, wixii uu guriga iyo beertaba ku haystay oo dhanna barakada Rabbigaa saarnayd.”

Waa hagaage Yuusuf wuxuu addoon u ahaa Fotiifar, laakiin Ilaah wuxuu barakadeeyey Yuusuf waayo wixii uu masuulka ka ahaa ayuu si xigmadaysan u maareeyey. Wuxuu siyaadiyey wixii lagu aaminay, waana waxa qofka masiixiga ah laga doonayo. Waa inaan qaadanno wixii Rabbigu ina siiyo, oo aan si wanaagsan u maarayno, laakiinse aan marnaba lagu ciyaarin.

Taasina waa sababta keenta in qofka masiixiga ah uu waxyaalaha qaar isaga xarrimo. Qofka masiixiga ah lacagta kuma fataalo, oo dhar aan loo baahnayn, fatuurado kala duwan iwm kuma iibsado isagoo dadka kale is tusaya. Taasi waxay noqonaysaa inaad caabudayso maalka. Waxay noqonaysaa inaad maal adduunyo ka dooranayso Ilaaha Baaqiga ah.

Haddii aad dhab ahaan tahay xerta Masiixa, lagama yaabo inaad sheey sida lacagta ama hantida oo kale ah aad sida ilaah-ku-sheeg ka dhigato. Tan kale ee masiixyiiintu ay neceb yihiin waa khamaarka. Masiixiyiintu lacagahoda ma daadiyaan, oo kuma bixiyaan ‘bakhtiya-nasiib’.

Waxaa laynaga doonayaa inaan ku kalsoonaanno Ilaaha Baaqiga ah, oo wax kastoo uu ina

siiyana aan si wacan u dhowrno. Khamaarku waa wax xun, iyo fataalnimo, aniguna waa necebahay, Ilaah wuxuu doonayaa inaan hantideenna ilaashanno, oo wuxuu eegayaa wixii uu ina siiyey. Wuxuu nabaadda inagu siiyey Ciise Masiix, laakiin faakihaysi iyo khamaar nabad inama siiyaan.

Hantidana isagay ka timaaddaa, wuxuuna rabaa inaan si xigmad leh u isticmaalno. Waxaan wakiil ka nahay wax waliba ee uu isagu abuuray ama dunidan keenay. Wax waliba way soo dhammaanayaan sida ku qoran warqaddii 2aad ee rasuul Butros cutubka 3aad. Inta Masiixu ka imanayo, wixii Ilaah ku siiyey si xigmadaysan u isticmaal. Ilaah wuxuu kugula xisaabtamayaa hantida uu ku siiyey, wuxuuna eegayaa sidii aad u isticmaashay.

SONG: REEL—CUT--

Waxaa intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli doontaan toddobaadka dambe (saacadahan oo kale isla idaacaddan) Waxaad waraaqaha noogu soo qortaan P.O. Box 21514, oo koodku yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan tel: 0707032060.Emailkayaga waa afarah@twr.co.ke. Websitekayaga waxaa weeye isna twr360.org. Farriinta waxaad ka hor-marinaysaan Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060